



SU'AALAHAA BADANAA LA ISWEYDIIYO EE LOOGU TALAGALAY
QOYSASKA LUQADAHA KALA DUWAN KU HADLA

Waxbarashada Gaarka ah iyo Ilmahaaga

BILAABIDA

Waa maxay waxbarashada gaarka ah?

Waxbarashada gaarka waa adeeg lacag la'aan ah oo ay dugsiyada siiyaan ardayda naafada ah. Waxaa ka mid ahaan kara tilmamo, daaweyn/terabit, tageerid habdhaqameed, ama taageerid dareen-bulshadeed.

Miyuu ku lahaan wax saameyn ah xaaladeyda sharciga socdaalka ama tan ilmaheyga waxbarashada gaarka ah

Maya. Ilmahaaga xaq buu u layhay waxbarashada gaarka ah iyadoon loo eegin xaalada sharciga socdaalka.

Ilmahayga ma laha naafo jireed. Muxuu dugsigu u layhay wuxuu layhay naafo?

Naafada barashada ma aha wax la arkayo. Waxay la xiriiraan sida uu ilmaha wax u barto, akhriyo, qoro, ama uga fiirsado. Ardayda waxay u baahan karaan inay ku shaqeeyaan kooxo yar ama isticmaalaan xiillooyin waxbarasho oo gaar ah.

Yaa hogaaminaya nidaamka waxbarashada gaarka ah xagga dugsiga?

Dugsi walaba si duwan ayuu u shaqeeya. Dugsiyada qaarkood waxay leeyihiin koox waxbarashada gaarka ah, oo ay ka mid noqon karaan:

| BARAYAASHA | DOORKA/SHAQADA |
|--------------------------------------------------------|--------------------------------------------------------------------------------------------|
| Macallinka fasalka | Wuxuu baraa mowdhuucyada heer-fasaleed |
| Macallin waxbarashada gaarka ah | Wuxuu baraa oo uu taageeraa ardayda naafada/liita |
| Takhasusle hadalka ama akhrinta | Wuxuu bixiyaa taageerid ah wax akhrinta ama hadalka/horumarinta luqadda oo Af Ingiriisi ah |
| Macallin Afka Ingiriisiga ka luqad labaad ahaan (ESL)r | Wuxuu caawiyaa ardayda luqaddaha kala duwan ku hadla inay bartaan Afka Ingiriisiga |
| Takhasusle/Macallin labo luqaddood | Wuxuu ku bixiyaa tilmaamta ama taageer labo (ama in ka badan) luqaddood |
| Turjubaan | Wuxuu turjumaa wada-hadalada dhex mara qoysaska iyo dugsiga |



Waa maxay Qorshaha Shakhsiyeesan ee Waxbarashada (IEP)?

Qorshaha Shakhsiyeesan ee Waxbarashada (IEP) waa barnaamij oo ay si wadajir ah isula abuuraan dugsiga iyo qoysaska. Wuxuu sharxayaa:

- sida uu ilmahaagu hadda wax u wado, oo ay ka mid yihiin kartida ilamahaaga
- hadafyada/yoolalka loogu talagalay ilmahaaga
- qorshe si uu u gaaro hadafyadaa/yoolalkaa, sida adeegyada iyo qabanqaabinta ee fasalka
- yaa bixinaya taageeridan (iyo goorma)
- horumarka ilmahaaga muddo kadib.

Dugsiga ayaa u samayn doona jadwal **kulanada Qorshaha Shakhsiyeesan ee Waxbarashada (IEP)** si loo abuuro qorshahan. Xaq baad u leedahay inaad caawiso sheegida IEP-ga ilmahaaga, kaqaybqaadato kulanada IEP, aad ku maqasho xuquuqdaada kulan walba ee IEP, aad maqasho xuquuqdaa kulan walba ka hor, dib ugu dhigto kulanada IEP, aad hesho dhammaan wixii war ah oo cusub, aad dib u eegto oo aad wax ka beddesho IEP-ga, iyo aad su'aalo weydiiso wakhti kasta.

Miyuu ilmahaaga ka bixi karaa adeegyada waxbarashada gaarka ah?

Haa. Xusuuso in adeegyada waxbarashada gaarka ah uu caawin karo ardayda inay si madaxbanaani ah u shaqeeyaan. Kulanada IEP waa wakhti haboon ee aad ku wadaagto su'aalahaaga iyo walacyadaada.

Ilmahaagu wuu ku dhiboonayaa dugsiga. Ma codsan karaa adeegyada waxbarashada gaarka ah?

Waxaad weydiisan kartaa dugsiga inay qiimeeyan ilmahaaga. Dugsiga ayaa laga yaabaa inuu ku taliyo ama ku talin adeegyada waxbarashada gaarka ah ama taageerooyin kale. Weydii macallimiinta ilmahaaga khiyaaradaa wakhti kasta.

DOORKEYGA

Waa maxay doorkeyga ee hab-waxqabadkan?

Dugsiyada Mareekanka waxay rabaan qoysaska inay la shaqeeyaan dugsiga ilmahooda! Adigaa ilmahaaga si fiican u yaqaan. Wadaag fikradaha ku saabsan ilmahaaga, waxa ay xiiseynayaan, dabeecadooda, iyo dhaqankooda. Weydiiso fikrado iyo caawin hadii loo baahdo

Kuma raacsani qorshaha dugsiga. Maxaan sameeyaa?

Xaq baad u leedahay inaad diido, wax ka beddesho, ama joojiso adeegyada waxbarashada gaarka ah. Laakiinse, waa wax muhiim ah inaad fahamto tallooyinka dugsiga kahor intaadan qo'aan qaadan.

LUQADDA

Sideen ugu helaa macluumaad luqaddeeda hooyo?

Waxaad xaq u leeday:

- inaad ku hesho **DHAMMAAN** macluumaadka luqaddaada
- inuu joogo turjubaan mar walba oo uu jiro wada-hadal ama kulan.

Maxaa dhacaya haddii uu ilmahaagu u baahdo labadaba ESL iyo adeegyada waxbarashada gaarka ah?

Ilmahaagu wuxuu xaq sharci u layhay inuu helo ESL, labo luqaddood, **IYO** adeegyada waxbarashada gaarka ah. Waa masuuliyada dugsiga inay siiyaan **DHAMMAAN** adeegyada uu ilmahaagu u baahan yahay.

Ilmahaagu wali wuxuu baranayaa Afka Ingiriisiga. Sidee baynu ku hubin karnaa in uu ilmahaagu u baahan yahay waxbarasho gaar ah?

Wuxuu noqon karaa wax adag in la ogaado ilmo baranaya luqad cusub inuu u baahan yahay waxbarasho gaar ah. Taasi darteen waxaa aad muhiim u ah in uu ka mid ahaado kooxda xirfadle ku hadla luqaddaada, haddii ay suurtagal tahay. Waxay ku qiimeyn karaan ilmahaaga luqaddaada. Tani waxay siineysaa fikrad sii wanaagsan ee ku saabsan barashada ilmahaaga. Haddii ilmahaagu ku dhiboonayo luqaddaada, fadlan u sheeg kooxda.

